

Oo Rabbiga Ilaah ahu wuxuu yidhi, "Ma wanaagsana in ninku keligiis ahaado; waxaan u samayn doonaa mid caawisa oo ku habboon." Ilaahna dabeeto wuxuu Aadan u keenay haadda duusha iyo dugaagga oo dhan. Oo wuxuu iyagii u bixiyay magacyo.



19

Oo magac bixintaasna waxa uu ku ahaa xariif. Laakiin dugaagga oo dhan iyo haadda oo dhan kamuu helin wax caawiya oo isaga ku habboon.



20

Ilaah wuxuu Aadan ku riday hurdo dheer. Dabeetana intuu isagii ka saaray feedh ka mida feedhihiisa ayaa waxa uu ka sameeyay naag. Naagtan Ilaah uu sameeyayna waxa ay ahayd lammaanaha ku habboon Aadan.



21

Ilaah wax kasta wuxuu ku sameeyay lix casho. Kaddibna Ilaah wuxuu barakadeeyay maalintii toddobaad oo u wuxuu ka dhigay maalin nasasho.



22

Beer Ceeden dhexdeeda, Aadan iyo Xaawa oo naagtiisa ahaydi waxay ku haysteen farxad dhammaystiran iyagoo addeecaya Ilaah. Ilaah waxa uu ahaa Rabbigooda, kan iyaga waxkasta siiya iyo saaxiibkood.



23

Markii Ilaah Sameeyay Waxkasta

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah, Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Bilowgii 1-2

"Erayadaada furniinkoodu wax buu iftiimiya." Sabuurka 119:130

Somali

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu ku magacaabo denbi. Ciqaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho.

Ilaah si aada ayuu inoo jecelyahay waxaanu soo diray Wiilkiisa, Ciise, si uu ugu dhinto Iskutallaab korkeeda una bixiyo qaanta denbiyadeenna.

Haddaad rabo inaad kasoo laabato xad-gudubyadaada, sidan ku dhex Ilaah: Ilaahaygii weynaayow, waxaan rumaysanahay inuu Ciise u dhintay aniga aawaday isagoo haddana nool. Fadlan ii kaalay oo iga cafi denbiyadayda, si aan imika u helo nolol cusub, oo aan adiga weligaa kuula jiro. Igu caawi inaan adiga awgaa u noolaado anoo ka dhigan ilmahaaga. Aamiin. Yooxanaa 3:16

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba Ilaah la hadal!

# Markii Ilaah Sameeyay Waxkasta



Waxa qoray Edward Hughes  
Waxa Tusaaleeyay Byron Unger; Lazarus

Waxa tarjumay Zemendale Translation Service  
Waxa dhaqan-geliyay Bob Davies; Tammy S.

Qisada 1 ee 60

M1914.org


Bible for Children, PO Box 3, Winnipeg MB R3C 2G1 Canada

Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.


Yaa ina abuuray? Kitaabka Quduuska ah, Ereyga Ilaah, wuxuu sheegayaa sidii uu kusoo bilaabmay cirqiga aadanuhu. Wakhti fog hortiis, Ilaah wuxuu abuuray ninkii ugu horreeyay waxaanu u bixiyay Aadan.



Ilaah wuxuu Aadan ka sameeyay ciidda dhulka. Markii Ilaah uu Aadan ku afuufay nafta, Aadan wuu noolaaday. Waxaanu is arkay isagoo dhex jooga beer qurxoon oo la yidhaahdo Ceeden.




Ka hor intii Ilaah aanu abuurin Aadan, waxa uu sameeyay duni qurux badan oo ay ka buuxaan waxyaalo yaab badani.




3

Tallaaboba tallaabo kaddib, Ilaah wuxuu sameeyay meelo taag ah iyo meel ban ah, ubaxyo udgoon iyo dhir dhaadheer, shimbaraha baalasha leh iyo shinni dananaysa, kalluunka badda ku jira iyo xammaaratada. Xaqiiqadii,




4

Bilowgii, ka hor intii Ilaah aanu waxba abuurin, Ilaah oo keliya ayaa jiray. May jirin dad iyo meel iyo waxkale toona. Waxba may jirin. Muu jirin iftiin iyo mugdi toona. Meel hoose iyo meel sare toona may jirin. May jirin shalay iyo berry midkoodna. Waxa jiray oo keliya Ilaah oo aan lahayn bar bilow. Dabeetana Ilaah fal ayuu sameeyay.



5

Bilowgii Ilaah samada iyo dhulkuu abuuray.




6

Dhulkuna qaab ma lahayn, wuuna madhnaa; gudcurna moolkuu dul joogay. Dabadeed Ilaah wuxuu yidhi. "Iftiin ha ahaado."




7

Iftiin baana ahaaday. Ilaahna iftiin sii wuxuu u bixiyey Maalin, gudcurkiina wuxuu u bixiyey Habeen. Waxaana jiray fiid iyo subax, isla maalin ah.




8

Maalintii labaad, Ilaah wuxuu isu keenay biyay badaha waaweyn, badaha yaryar, iyo harooyinka iyagoo ka hooseeya Samada. Maalintii saddexaad, Ilaah wuxuu yidhi, "ciidda engegani ha muuqato," sidaasayna ahaatay.




9

Ilaah sidoo kale wuxuu amray inuu dhulku soo saaro dhir waaweyn iyo kuwo yaryar iyo doog iyo ubaxyo. Sidaasayna ahaatay. Waxaana jira-fiid iyo subax, maalintii saddexaad.



10

Dabeeto Ilaah wuxuu sameeyay cadceedda, iyo dayaxa, iyo xiddigo badan oo aanay cidi tiring karin. Oo waxaana jiray fiid iyo subax, maalintii afraad.




11

Xayaawaanka badda ku jira iyo kalluunka iyo shimbiruhu waxay ahaayeen kuwii xigay ee Ilaah samaynay. Maalintii shanaad Ilaah wuxuu sameeyay kalluunka waaweyn iyo kuwa yaryar, shimbaraha lugaha dhaadheer sida gorayada iyo shimbaraha yaryar.



12

Ilaah wuxuu sameeyay nooc kastoo kalluun ah si ay u buuxiyaan biyaha dhulka, waxa kaluu sameeyay shimbaraha nooc kasta si ay ugu raaxaystaan dhulka iyo badda iyo cirkaba.



13

Intaas kaddib, Ilaah markale wuxuu yidhi, "Dhulku ha soo bixiyo uun nool oo caynkiisa dhala, ..." Nooc kasta oo xayawaan iyo cayayaan iyo xamaarato ah ayaa dabeetana samaysmay. Waxa jiray oo samaysmay maroodiyaal dhulka kaga gariirinaya iyo dabaggaalayaal. Daayerro iyo yaxaasyo.




14

Dirxiyada iyo cayayaanka kale. Geriga qoorta dheer iyo bisadaha yaryar ayaa iyaguna abuurmay. Nooc kasta oo xayawaan ahna waxa sameeyay Ilaah maalintaas. Oo waxaa jiray fiid iyo subax maalintii lixaad.



15

Ilaah maalintii lixaad wuxuu sameeyay wax aad cajiib ah. Waxwaliba hadda diyaar ayay u ahaayeen ninka. Waxa jiray cunto ku taalla dhirta iyo xayawaan u adeegaya.




16

Ilaahna wuxuu yidhi, "Aan nin inoo eg ka samayno arageenna, oo iyagu ha xukumeen kalluunka badda, iyo haadda hawada, iyo xoolaha, iyo dhulka oo dhan, iyo waxa dhulka gurguurta oo dhan." Markaa Ilaah wuxuu dadka ka abuuray araggiisa, oo Ilaah araggiisa ayuu isaga ka abuuray.



17

Ilaah wuxuu Aadan ku yidhi. "Geed kasta oo beerta ku yaal wax baad ka cuni kartaa. laakiin geedka aqoonta wanaagga iyo, xumaanta waa inaanad waxba ka cunin: waayo, maalintii aad wax ka cuntid hubaal waad dhiman doontaa."



18